**FLEX PRICING PILOT WAY BAAQATAY**

Waxaan ognahay inaad diirada saartay caafimaadka iyo fayodhawrka qoyskaaga iyo bulshadaada iyadoo xaalada COVID-19 ay ku sii socoto inay kobocdo-umana baahnid inaad diirada saartid isticmaalka tamartaada, sidoo kale. Adigoo taa niyada ku haya, **waxaan baajineynaa Flex Pricing Pilot** oo loo qoondeeyey inay billaabato Abriil 1, 2020. Waxaad ku jireysaa qorshahaaga qiimeynta korontada ilaa ogeysiis dheeraad ah.

Laga bilaabo bisha Abriil, biilkaaga korontada wuxuu tusinayaan isticmaalkaaga korontada inta lagu gudajiro saddexda waqti oo kasta - hooseeya, mid-dhexe iyo kan kugu-sarreeya - laakiin sicirka korontada ayaa isku mid noqonayo waqti kasta. sidaa darteed qarashka ku jira biilkaaga ayaa la mid noqonayo sida had iyo jeer.

Maaddaama COVID-19 uu saameynayo tirada dadka ku sii kordheysa ee ku nool bulshadeena, waxaan diyaar u nahay oo aan qaadeynaa talaabooyin aan ku hubineyno inaan halkaas ku sii wadno si aan u buuxinoo baahiyahaaga tamarta. Badbaadadaada iyo badbaadada shaqaalaheena ayaa had iyo jeer noqoneyso ahmiyadeena koowaad. Ma jareyso adeega macaamiisha guryaha degan ilaa ogeysiis dheeri ah. Haddii ay dhibaato kaa haysato bixinta biilashaada, nala soo xiriir annagana waxaan kuu diyaarineynaa qorshe lacag bixin oo adiga kuu shaqeeya. Raadi macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jawaabteena COVID-19.

Waxaan sii wadeynaa inaan si dhow ula soconno xaaladdan iyo tilmaamaha caafimaadka maxalliga ah iyo ta qaran ahaan annaga oo go'aamineyna bilowga cusub ee tijaabada. Waan kula soo socodsiineynaa goorta taariikh cusub la qorsheeyay, waxaanna hubineynaa inaad heysatid dhammaan macluumaadka, aaladaha iyo kheyraadka aad u baahan tahay ka hor inta aysan bilaabmin Flex Pricing.

Dib-u Fiiri macluumaadka ugu dambeeyay ee ku saabsan Flex Pricing Pilot. Waxaad had iyo jeer i-meel noogu soo diri kartaa inquire@xcelenergy.com ama naga soo wac 800.895.4999 wixii su'aalo ah ama inaad ka baxdid barnaamijka tijaabada ah.